

JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2022

AF-SOOMAALI



GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA



OK

Empty rectangular box with a vertical black bar in the center.


Total Score

Magaca.....

Dugsiga

R/Lambar.....

**JAMHUURIYADDA SOOMALILAND
GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA SOMALILAND
FASALKA AF-RAAD**



2021 – 2022

Waqtiga 2 saacadood

10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.

TILMAAMO:

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay 11 warqadood oo daabacan.
Tiri imika, oo wargali horjoogaha haddii ay wax kaa maqan yihiin ama ay dheeraad yihiin.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay 5 qaybood:

QAYBTA 1AAD: SHEEKO	30 DHIBCOOD
QAYBTA 2AAD: MAANSO IYO AF-MALDAHANE	30 DHIBCOOD
QAYBTA 3AAD: MAAHMAAHYO IYO HEES-HAWLEED	10 DHIBCOOD
QAYBTA 4AAD: NAXWE	10 DHIBCOOD
QAYBTA 5AAD: CURIS	20 DHIBCOOD
WADAR GUUD	100 DHIBCOOD

- Ka jawaab dhammaan su'aalaha qaybta 1^{aad} – 5^{aad}
- Lama oggola Mobile iyo waraaqo kale

QAYBTA KOOWAAD: SHEEKO

AKHRI SHEEKADAN, DABADEED KA JAWAAB SU'AALAHA LAGAA WEYDIIEY. (30 dhibcood)

Calas iyo Cadduur waxa ay ahaayeen wada jirato han iyo halaadaba inay wadaagaan u ballamay. Xagga gu'ga isku fac bay ahaayeen, xagga wax wada qabsigana walaalo doog iyo abaarba is kaashada. Geelu, tan iyo maalintay dab ka baydheen, wuu isugu jiray. Weligood qayb wadaag bay ahaayeen oo midkoodna kan kale wax ma dheeraysan jirin. Niman is xog og ayey ahaayeen oo waxba uma kala qarsoonayn.

Marka geela laga caano lisayo, Cadduur baa haaneedka qaban jiray, Calasna miskeedka ayuu lahaa halkan magaabada Muuse yare ayaa iska lahaa ibdarkana odayga Muuse oo sabool ahaa. Wiilasha yaryari marka ay geela ka caano dhamaan, weelasha guryaha ka yimidna la buuxiyo, ayey Calas iyo Cadduur soo caano maali jireen oo wadaag hadhuubka isugu dhiib dhiibi jireen. Cadduur nirgaha aad buu ugu roonaa oo intuu marka hore dhufsiyo, ayaa uu gadaalna dharaq ugu reebi jiray.

Wax ay caynkaas u wada dhaqmaanba, Cadduur baa cishadii dambe guursaday oo gawrihii ka hoyday. Hawlo badan ayaa kolkaas Calas ku soo baxsaday. Cadduur waxay markaas walaalo ahaayeen gabadh yar oo loo reebay. Calas isaga oo saaxiibkii Cadduur hadal u dusinaya ayaa ku yidhi "waar Cadduur, dee adigu aayahaagii dhistaye, hadmaad anna dhaxanta iga hoynaysaa"? "diyaar baan kuu ahaye soo il-dayo" ayuu Cadduur ugu jawaabay. " oo maxaad ii fogaynaysaa miyaad I soo dhawaysidba" ayuu Calas ku yidhi. "Oo kolkaas ma yartan aan walaalaha nahay ayaad I leedahay iigu xuddun-xidh" ayuu Cadduur weydiyey. "Hadal waayeel waa guud-mare Haa" sidaas baa Calasna yartii Cadduur la dhalatay ku guddoontay.

Xishood iyo xaq-dhawr xididnimo ayaa labadii nin xaaladoodii hore ku sii biirtay. Muuse yare oo Cadduur walaalkii ahaa ayaa Calas geelii la raacay, illayn Cadduur haatan cuslaaye. Muuse yare nin sidii walaalkii u feejigan xoolahana u roon ma ahayn, balse xoolo moog dhego adag ayuu ahaa. Maalintii dambe ayuu Calas yarkii seeddigii ahaa geelii kob barwaaqo ah kula soo dabbaalay oo markii uu xasiliyey ku yidhi "Muuse geela isha ku hay oo kobtaas yaanu ka bixin, waan soo laabanayaaye"

Mar alle markii uu dhaqaaqay, ayuu yarkii barqo-libaax madaxa iyo minjaha maray, geeliina kamaba dambayne hawdkiiisuu iska xulay. Gabbal dhacii ayuu Calas soo noqday, mise cayn xoolaadba carrada ma joogto. Wax uu geelii raad guraba, wax uu kolba geed dheer fuulaba, oo uu bidhaan eegaba, geelii ayuu goor fiidkii ah baadi doon ku helay. Raadcadii geela yarkii baaba kaga darraaye, ruuxiisii ba waa waayey. Wax uu u qayliyaba, mar dambe ayuu kii soo hambabaray meel halkan ah "hee" ka yidhi. Inta ay neefi ka soo booday ayaa uu ku yidhi "waar ma nabad-qabtaa"? iyo "Haa". "oo goormaa geelii kuugu dambaysay" "markii aad iga dhaqaaqday ayaa eebahay xanuun iska qabo I yidhi oo aan miyir belay; imikana geelii meel uu jiro garan mayo." Calas inta uu aad u dhirfay xishoodna xakameeyey ayuu gabay ku yidhi:

***“Hadduu seeddigaa gaban yahoo geela kula raaco
Oo aanad guulguul Karin geeluna hallaabo
Illayn waad galgalataa sidii gaajo nimay hayso”***

Cambaro – Cadduur walaashi wax la koriyaba oo ay baarka feedhaba, sideed iyo toban jir markii ay gaadhay ayaa uu Calas u soo geed fadhiistay. Walaalkood, maalintaa ka hor in uu nin dunta ugu xidhay oo ay doonnan tahay, uma uu sheegin. Calas isaga oo aan Cambaro waxa ay gadaal ka noqon doonto ka warqabin, ayuu aqoontii uu aabaheed iyo hooyadeed u lahaa ku dir-guursaday.

B) GOOBO GELI WEEDHA SAXDA KU AH

(20 dhibcood)

1. Calas iyo Cadduur waxa ay ahaayeen laba nin oo ku heshiiyey inay
 - a) Dhib iyo dheefba qaybsadaan
 - b) Kala shaqaystaan
 - c) Kala xishoodaan
 - d) Intaba
2. Umal waxa uu qayb u lahaa
 - a) Haaneedka
 - b) Miskeedka
 - c) Ibdarka
 - d) Midnaba
3. Cadduur waxa uu ahaa nin nirgaha yar yar
 - a) Qadiya
 - b) Dayaca
 - c) Ul la dhaca
 - d) Dhaqaaleeye
4. Hasha caanaheeda marka la lisayo waxa loo qaybin jiray
 - a) 3 meelood
 - b) 4 meelood
 - c) 2 meelood
 - d) 10 meelood
5. Muuse yare waxa uu walaalkii Cadduur kaga duwanaa
 - a) Xoolo moogida
 - b) Feejignaanta
 - c) Furfurnaanta
 - d) A iyo B
6. Calas waxa uu la xididay
 - a) Cadduur iyo Muuse
 - b) Umal iyo Muuse
 - c) Cadduur oo qudha
 - d) Muuse oo qudha

7. Calas iyo Cambaro waxa ay ahaayeen laba qof oo
 - a) Haasaawe dhex maray
 - b) La isa siiyey
 - c) A iyo B
 - d) Midnaba
8. Cambaro inay Calas u doonnan tahay oo la siiyey
 - a) Waa laga talo galiyey oo way ogayd
 - b) Lagalama tashan
 - c) Markii loo soo geed fadhiistay ayuun bay ku war heshay
 - d) B iyo C
9. Da'da Cambaro loogu soo geed fadhiistay waxa ay ahayd
 - a) 14 jir
 - b) 14 jir – 16 jir inta u dhaxaysa
 - c) 14 jir – 20 jir inta u dhexaysa
 - d) Midnaba
10. Cambaro lagama war hayn gaari iyo basari mid ay noqon doonto, balse waxa lagu guursaday
 - a) Hiddo-raac iyo aqoonta hooyadeed iyo aabaheed loo leeyahay
 - b) Quruxda Rabbi ku deeqay
 - c) Fariidnimo Alle u dhaliyey
 - d) Lexejecladeeda iyo dhaqashadeeda

T) EREYADAN U MACNEE SIDA AY UGU JIRAAN SHEEKADA (10 dhibcood)

- 1) Halaabad: (2dhibcood)
.....
.....
.....
- 2) Hadhuub: (2dhibcood)
.....
.....
.....
- 3) Dirguursi: (2dhibcood)
.....
.....
.....
- 4) Barqo-libaax: (2dhibcood)
.....
.....
.....

5) Guulguul:

(2dhibcood)

.....
.....
.....

QAYBTA LABAAD: MAANSADA IYO AF-MALDAHANAHA

(30dhibcood)

MAANSADA

**1. Haddii weerar la qaado
Wegen buu ka baxaaye
Ma wanjaaf la ridaa**

a) Soo koob dulucda guud ee tuducyadani xambaarsan yihiin (3dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....

t) Muxuu yahay af-maldahanaha ku jira tuducyadan kor ku xusani (2dhibcood)

.....
.....
.....

**2. Daab gudimo weli sooma jarin wiilashaan dirayey
Halka dunida lagu geeddi yahay dayiba maysaane
Ummaddii daryeel weli ma helin daacadda ahayde
Sidii bay u dooyeysan tahay damasha waaweyn**

b) Si kooban u sharrax ujeedka ay xambaarsan yihiin tuducyadan kor ku qorani (3dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....

t) Waa ayo wiilasha la diray ee uu gabayaagu sheegayaa, maxaase loo diray? (2dhibcood)

.....
.....
.....

**3 Masallaha nimaan ii dhigayn midig ma saaraayo
Ninka aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho**

b. Si kooban u sharrax tuducyadan kor ku yaal (3dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....

T. Sheeg abwaanka curiyey gabayga tuducyadani ku jiraan (2dhibcood)

.....
.....
.....

AF-MALDAHANAHA

**AKHRI TUDUCYADAN SOO SOCDA MID KASTANA KA JAWAAB WEYDIIMAHA
LAGAA WEYDIIEY**

**1. Ma tukubay sidii habar tu kale tuugmo ugu jeedda ?
Sidii tuduc haldhaa wado miyaan ciidda tumayestay?**

B. Sheeg af-maldahanaha ku jira tuducyadan kor ku qoran (3dhibcood)

.....
.....
.....

T sababee doorashadaada (2dhibcood)

.....
.....
.....
.....

**2. Waxan ahay nin aragaaga jecel aadna kuu necebe
Waxan ahay nin oday aad u tahay aan ku aaminina**

B. Sheeg af-maldahana ku jira tuducyadan kor ku qoran (3dhibcood)

.....
.....
.....

T Sababee doorashadaada

(2dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....

**3. “Hablaha soomaaliyeedna
Haddaan quruxdooda saanyo
Haddaan miisaanka saaro
Sagaal tobankii adaa leh”**

B Sheeg af-maldahana ku jira tuducyadan kor ku yaal

(3dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....

T Sababee doorashadaada

(2dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

QAYBTA SADDEXAAD: MAAHMAAHDA IYO HEES HAWLEEDYADA(10 Dhibcood)

1. “Darandoorriyaaba naasnaasi”

B) falanqee maahmaahdan goorta la cuskado iyo ujeedka loo adeegsado (2dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

T) Si kooban u sharrax waxa ay wadaagaan maahmaahdan iyo tuducan gabayga ahi

- I. **“Labaatan jir wixii kugu raacay lixdan jirka kaagama hadho”** (3dhibcood)
- II. **“Wiil yaraan ku loofaray wuxuu lumiyeey raadcee”**

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

2. **“Saanta gibisha ah
Ee guryaha taal
Geeska fidhinka ah
Ee gujada kulul
Gadhoodh iyo subag
Oo la galab lulo
Garo mooyee
Geelu kulama leh”**

B) Meesiga xoolaha ah ee hees hawleedan loogu heesaa waa kee? (2dhibcood)

.....

.....

.....

T) Maxay hees hawleedani kala mid tahay hees hawleedda Shubaasha la yidhaa, maxayse kaga duwan tahay? (3dhibcood)

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

